



xoolo badan, wax i dhaxlaya na gabar kaliya ayaa ka jirta ee maalkayga seddax meelood labo ma sadaqeystaa? Wuxuu yiri Nabigu (S.C.W.): MAYA' waxaan iri: barna Rasuul Alloow? Wuxuu yiri: Maya! Waxaan iri: Seddex meelood meelna? Wuxuu yiri: 'Haah' iyadaana waliba badan. Dadka dhaxalkaaga leh inaad ka tagtid iyagoo Hodon ah ayaa kuu kheyir badan, inaad ka tagtid iyagoo sabool ah oo aad ku qasabto inay dadka gacmaha u hoorsadaan. Saddaqa kasta oo aad wajiga Alle ula baxdidna ajar baad ka heleysaa, xataa raashin xoogaa ah oo aad haweentaada afkeeda gelisidba ha ahaadee, Alle waa kaa ajar siinayaa. Dabadeed waxaan iri: Rasuulkii Alloow saaxibbaday maka harayaa? Wuxuu yiri: Rasuulkii Alle (S.C.W.) kama aad haraysid camalkii aad fasho oo aad Eebbe dartii ula jeeddida ajar iyo derajaad ka sii helaysaa, waxaa na laga yaabaa inaad muddo noolaato oo cimri dheer lagu siiyo oo ay markaas qoon muslimiin ah kaa faa'iidaystaan, qoon gaala ah na gacantaada lagu ciqaabo. Ka dibna Rasuulkii Eebbe Ilaahay ayuu baryay oo yiri: Alloow asaxaabtayda hijradoodii ka yeel mid dhan oo guulaysata, gadaal na ha u celin. Waxaa se in loo murugoodo leh Sacan ibnu Khalwa ee gadaal looga soo tegay, Makana ku dhintay, Rasuulkii Allena (S.C.W.) naxariis iyo samman ayuu Eebbe uga baryay.' **(Bukhaari iyo Muslim).Abuu Hureyrah (A.K.R.).wuxuu yiri: Rasuulkii Alle (S.C.W.)wuxuu yiri: "Alle fiirin maayo jirkiinna iyo suuraddiina toona ee wuxuu fiirinayaa qalbiyadiinna iyo camalladiinna." (Muslim).Abuu Muusa al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: waxaa Rasuulkii Alle (S.C.W.) la waydiiyay: nin geesinnimo u diriraya iyo mid ficillo qabiil ama qaran u diriraya iyo mid is tustus u diriraya, intaas midkee ayaa jidka Eebbe ku diriraya? Wuxuu ku jawaabay rasuulkii Alle (S.C.W.) kan u diriraya inay Diintii Eebbe kor noqoto ayaa jidkii Alle ku diriraya.' **(Bukhaari iyo Muslim).Abuu Bakrah Nufayc ibn al-Xaaris as-Saqfi (A.K.R.) wuxuu yiri: Rasuulkii Alle (S.C.W.) wuxuu yiri: markii ay laba qof oo muslim ahi seef iskala hor yimaadaan, dilaha iyo la diluhuba waa ehlu Naar.'** Waxaan iri: Rasuul Allow kan dilay walaalkii garannaye, kan la dilay muxuu galabsaday oo Naarta loo gaynayaa? Wuxuu ku jawaabay inuu saaxibkii dilo ayuu is na doonayay.' **(Bukhaari iyo Muslim)."****Jimco suubban. W/D: Xasan Cabdulle Calasoow "Shiribmaal"****